Magaalada Saint Paul Waaxda
Hawlaha Guud
Danabka Bulaacadda

# OGEYSIISKA TIJAABINTA BULAACADDA

Necesita esta traducción? Comuníquese con nosotros al 651-266-6234.
Xav tau qhov no txhais los? Hu rau peb ntawm 651-266-6234.
Ma u baahan tahay tarjamo, naga soo wac telefoonka 651-266-6234.

---

## Xaggee iyo goormaan tijaabin doonaa bulaacadahena:

Magaalada Saint Paul waxay xaafadaada ka fullin doontaa tijaabintena sannadka laga bilaabo **Juun 01** ilaa **Sateembar 30, 2018.** Shaqaalaha fattashaadda uma baahna in ay soo galaan guryaha iyo dhismooyinka haddii aysan u baahanin in ay galaan saqaafyada dhismaha.

## Sida aan u tijaabino iyo sababta aan u tijaabino bulaacadahena:

Waxaan si ammaan ah u tijaabinaa bulaacadaha si aan u ogaano haddii ay jiraan meelo ay ka dhibciyaan ka hor inta aysan noqonin dhibaatooyin waaweyn. Tijaabintaan waa lagama maarmaan si loo sugo in siistemkena bulaacadda u shaqeyso si wanaagsan. **Waxaan tijaabinaa bulaacadahena anaga oo qiiq ku furna bulaacada si loo ogaado meelaha ay ka dhibciso iyo cilladaha ka jira meelaha ay isaga xeran yahiin.** Tijaabinta waxay qaadataa ku dhawaad 30 daqiiqo.

## Sida tijaabinta kuu saamayso adiga:

Waxaa dhici karto in aad aragtid qiiqa tijaabinta oo ka soo baxa daboolada danabka, dareerinta roobka, tubooyinka saqafka, iyo aasaasyada dhismaha. Lama filaayo in qiiqa tijaabinta soo galo gurigaada ama dhismaha, hase ahatee haddii uu soo galo, ha ka walwalin - fur albaabada iyo dariishadaha si aad hawo u siisid guriga. Qiiqa tijaabinta wuxuu dhamaan doonaa dhakhso. Qiiqa tijaabinta waa ammaan, hase ahatee wuxuu keeni karaa in xoogaa la dhibsado.

*Haddii uu gurigaada ama dhismaha ku jiro qof qaba dhibaatooyinka neefta iyo/ama aan dhaqaaqi karin, fadlan la xariir qandaraaslahena, S.E.H. telefoonka 612-219-4231.*

## Waxa aad u baahan tahay in aad samaysid:

**Haddii aad qiiqa tijaabinta ku aragtid gudaha gurigaada ama dhismaha, ma jirto sabab aad u walwashid. Waxaad wici kartaa qandaraaslahena, S.E.H. telefoonka 651-238-0572.**

Waxaan la shaqeynaa boliiska iyo waaxyaada dabka labadaba inta ay socoto hawsha tijaabinta si loo hubsado in qof kasta uu la socdo tijaabinta iyo in aan Waaxda Dabka loo wicin digniin been ah.

Fiiri khariidada ku dhex jirta si aad u ogaatid haddii xaafadaada ka tirsan tahay xaafadaha la tijaabiyo. Waan ku soo wici doonaa, waxaan ogeysiis kuugu dhaafi doonaa albaabka ka hor inta aan la gaarin tijaabinta.

**Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah, la xariir qandaraaslahena, telefoonka 612-219-4231 ama booqo stpaul.gov/sewertesting.**

# MACLUUMAADKA KU SAABSAN TIJAABINTA AMMAANKA BULAACADDA

Habka:

- Waxaa siistemka bulaacadda lagu furi doonaa qiiqa tijaabinta. Natiijo ahaan, waxaa dhici karto in la arko qiiqa tijaabinta oo ka soo baxa daboolada godadka fattashaada (manhole covers), dareerinta roobka, tubooyinka saqaafka, iyo aasaasyada dhismaha.
- Tijaabinta ammaanka bulaacadda waxay qaadan doontaa ku dhawaad 30 daqiiqo.
- Shaqaalaha fattashaadda uma baahan doonaan in ay soo galaan dhismooyinka, haddii aysan jirin baahi in ay galaan saqafyada dhismaha.
- Waa la isticmaali karaa tubada biyaha iyo qalabka musqusha inta ay weli socoto tijaabinta.

Si looga hortago in qiiqa tijaabinta soo galo gurigaada ama dhismaha *(dhamaystir ka hor inta aan la bilaabin tijaabinta):*

- Fur tubooyinka biyaha muddo dhowr sekan adiga oo ku fura saxan dhaqa aan la isticmaalin, saxanka qabeyska, iyo dareerinta si aad u buuxisid meelaha laga fattasho.
- Waxaad biyo ku shubtaa mid kasta oo ka mid ah dareerinta kabbiska (ugu yaraan 1 galan).
- Haddii aad qabtid tubooyin cillado qaba (sida kuwa aan qabashada lahayn), waa in aad la tashatid aqoonyaanka tubooyinka ee shattiga haysta.

*Haddii aad ogaatid in qiiqa tijaabinta soo galay gurigaada ama dhismaha:*

- HA walwalin.
- Fur albaabada iyo dariishadaha si aad u leyrisid guriga una saartid qiiqa tijaabinta.
- La xariir qandaraaslaha mashruuca, S.E.H. telefoonka 651-238-0572.
- Qiiqa tijaabinta ma wasakheeyo darbiyada ama furnitureka; mana reebo usug.
- Mustaqbalka dhaw, la xariir aqoonyaanka tubooyinka ee shattiga haysto si aad u ogaatid haddii aad dhibaato ku qabtid meesha ay isaga xeran yahiin bulaacadaha.

*Ammaanka iyo arrimaha caafimaadka:*

- MA jirto halis lagala kulmo habka tijaabinta bulaacadda. Qiiqa tijaabinta ma dhallin doono dab.
- Boliiska Saint Paul iyo Waaxyada Dabka waxaa la ogeysiin doonaa tijaabinta ammaanka bulaacadda.
- Qiiqa tijaabinta ma gaarsiiyo waxyeelo caafimaadkaada, hase ahatee wuxuu keeni karaa xoogaa qufac. Dhibaatada lagala kulmo qiiqa tijaabinta waa ku meel gaar, waa in uu dhamaado kaddib marka u dhawaashada joogsato. Haddii aad la kullantid qiiqa tijaabinta - iska ilaali in aad ku dhawaatid haddii aad ka maarmi kartid.
- Qiiqa tijaabinta ma gaarsiiyo waxyeelo xoolaha guri joogga, hase ahatee waa fikrad fiican in qeyb ahaan la furo dariishadaha si loo leyriyo, waa intaas uu qiiqa tijaabinta soo galo guriga ama dhismaha.
- Haddii ay fiican yahiin meelaha tubooyinkaada isaga xeran yahiin iyo biyo ku jiraan dhamaan meelaha fattashaadda dareerinta (drain traps), ma jirto dhibaato.
- *Haddii uu dhismahaada, ganacsigaada, ama gurigaada ku jiro qof dhibaato ku qaba neefsiga iyo/ama dhaqaaqa, fadlan la xariir qandaraaslahena, S.E.H. telefoonka 612-219-4231.*
- Koobiga Warqadda Xogta Ammaanka Maadada (Material Safety Data Sheet) (MSDS) ee qiiqa tijaabinta waxaa laga heli karaa stpaul.gov/sewertesting

Su'aalaha ka hor inta aan la Gaarin Tijaabinta - Fadlan la xariir Danabka Bulaacadda Saint Paul (Saint Paul Sewer Utility):

Responsive Services • Quality Facilities • Employee Pride — SAINT PAUL PUBLIC WORKS

<u>Xariirka Aasaasiga</u>:
S.E.H.
612-219-4231

<u>Xariirka Kale:</u>
Miiska Adeegga Danabka Bulaacadda
(Sewer Utility Service Desk)
651-266-6234

Su'aalaha Waqtiga Tijaabinta - Fadlan la xaiir S.E.H.:

SEH

Kooxda Tijaabinta Bulaacadda (S.E.H. - Qandaraaslaha Saint Paul)
651-238-0572